

# BULSHADA BUUGGA MACLUUMAADKA

**Buugaan ayaa bulshada maclumaad dheeri ah kasiinaaya kana caawinaaya udiyaar  
garoowga difaacashada xaquuqdooda.**

# MAXAA DHACAY?

bISHII nUFEEMBAR 8, 2016 Donald Trump ayaa loodoortay madaxwaynaha Maraykanka. Wuxuu xafiiska qabtay bishii Janaayo 20, 2017.

# MAXAAN OGNAHAY?

Donald Trump asagoo raacaaya ololihiisa kadhanka ah soogalootiga kuna dhisnaa nacaybka. Wuxaan ognahay in bulshadu cabsi badan qabto. Manaqaano waxa dhabta ah ee uu Donald Trump samayn doono, laakiin waxaan rabnaa inaad ogaaato **adinka ayaan idin lajirnaa** si aan dhamaanteen udifaacano una ilaalsano xaquuqdeena. Dagaalkaan waan kuwadajirnaa.

# WAXA AY TAHAY INAAD OGAAATO?

## **Buug dhexdiisa ayaad kahelaysaa macluumaad dheeri ah:**

- Kalahadal qareen dhanka socdaalka ah kiiskaaga
  - Samayso qorshaha sida isbadaladaan usaamayn karaan qoyskaaga
  - Baro xaquuqaha aad leedahay
  - Soosheeg danbiyada nacaybka ah
  - Baro waxyaabaha magaaladeenu samaynayso si ay udifaacdoo mujtamacyadeena
  - Iska ilaali khiyaanada lagugula kacaayo!

# CUNUGAAGA WUXUU XAQ ULEEYAHAY INUU AADO ISKUULKA



Dugsigaagu kuma waydiin  
karo xaalada soogalootimo ee  
cunugaaga ama qoyskaaga

Waa sharci daro in dugsigu  
kuutakooro adigga ama cunugaaga  
sabab laxariirta xaaladiina  
soogalootinimo, wadankaad  
udhalateen, diinta, isirka, ama  
midabka.



Haddii cunugaagu  
ubaahanyahay caawimaad laga  
siiyo barashada Ingiriisiga,  
wuxuu xaq uleeyahay  
barnaamijka gaarka ah si  
arintaan looga caawiyo



Waxaad xaq uleedahay qof wax kuutafsiira ama  
turjumaan si aad uga qaybqaadato  
waxbarashada ilmahaaga.





# MACLUUMAAD MUHIIM AH KUSAABSAN HELITAANKA CAAFIMAADKA

Waxaad xaq uleedahay naad caafimaad hesho ayadoon laga fiirin cida madaxwayne ka ah Maraykanka.

Adeegyada Caafimaadku waa kuwo amaan u ah dhamaan dadka reer New York inay helaan. Daryeel bixiyaasha caafimaadku maraacayaan xaalada soogalootinimo ee bukaanada.

Hadaad xaq uleedahay, waa inaad iskaqortaa barnaamijyada caafimaadka ee dawlada iyo kuwa gaarka looleeyahay. Wac **855-355-5777** si aad ulahadasho fududeeye dhanka caafimaadka ah.

Waxaad xaq uleedahay caawimaada dhanka luuqada iyo qarashka markasta ood aado daryeele caafimaad oo New York kuyaala.

Xarumaha caafimaadka bulshada iyo isbitaalada degmada ee dawlada iyo kuwa gaarka looleeyahay ayaa ah kuwo tayo sare leh, qiimo jabana adeeg kusiinaaya qfkasta oo reer New York ah, ayadoon laga fiirin xaaladood dhanka socdaalka.

# HADDII ALBAABKAAGA...

## HA U OGOLAAN INAY GURIGA GUDAHU UGALAAN BILAA FASAX

Saraakiisha socdaalku—si lamid ah kuwa booliska—  
magali karaan gurigaaga ayagoon wadan fasax  
garsoore sosaxiixay.

- Marna hafurin albaabka
- Waydii finay waraaqda cadaynta maxkamada  
hoos kasoo tuuraan ama daaqada kaatusiyaan
- Xaqiiji inay wataan amar uu kuqoranyahay  
maqacaagu
- Xattaa hadii saraakiisha socdaalku wataan amar  
maxkamadeed, haduu yahay qof aadan aqoon  
ama gurigaaga joogi jiray, uma adeegsan karaan  
inay gurigaaga kusoo galaan



### Hadaysan wadan amar maxkadeed

Hadaysan saraakiisha socdaalku wadan amar  
maxkamadeed, ama amarka ay wataan uu kusocdo  
qofkale oodan aqoon ama aan gurigaaga joogin,  
ushaq inaadan quriqa ufasixi karin bilaa amar  
maxkamadeed, ama qofkaas inuuusan halkaan  
kunoolayn, sidagana uwaydiiso inay kaatagaan.

Haday raadinayaan qof aad taqaano, uma  
baahnid inaad usheegto meesha qofkaas jiro—  
waydii inay macluumaadka lagalasoo xariiraayo  
sheegaan una sheeg inay kaaga tagaan guriga.

### Haday wataan amar maxkadeed

Haddii saraakiisha socdaalku wataan amar  
mxkamadeed oo magacaagu kuqoranyahay, wali  
xaquuq ayaad leedahay!

Waa inaadan waxba usheegin, kudheh:

## "WAXAAN CODSANAYAA QODOBKA SHANAAD WAXAANA XAQ ULEEYAHAY INAANAN WAXBA SHEEGIN."

- Kucelceli inaay hadalkaas haday warkaaga  
iskadhaga tiraan.
- Marna ha usaxiixin wax dukumiinti ah ooy  
wataan. Markasta waxaad ubaahantahay  
qareen kuusheega haday sax tahay inaad  
saxiido wax dukumiinti ah.
- Hasiinin laanta socdaal wax dukumiintiyo  
aqoonsi ah ood wadankaaga kalatimid sida  
baasaboorkaaga.

### Haday kuxiraan ama dadka kale

Haddii saraakiisha socdaalku ayagoon amar  
maxkamadeed wadan kuxiraan ama dadka kale ee  
gurgaaga jooga xiraan, waxba ha usaxiixin waxa  
haqiranin.

- Hayso nambarka qareenka aad  
wici karto.
- Xaqiiji inaad kuhaysato nambarada iyo  
dukumintiyada muhiimka ah meal qarsoon oo  
kamid ah guriga meesha qoyskaaga ama  
saaxiibadaa kaheli karaan si ay kuucaawiyaan .

### Duub waxa idin dhixmara


Waa inaad ysheegtaa qofkale oo guriga jooga nuu  
duumo muuqaalka waxa saraakiisha idin dhixmara,  
ama kuduub codka/muuqaalka taleefankaaga.  
Marka saraakiisha socdaalku kaatagaan, adigga  
ama shaqsiga kaaduubaaya aaya qoraaya waxkasta  
ooy xasuustaan: dharka ay saraakiisha socdaalku  
xirnaayeen, nooca gaariga  
ay wateen, waxa dhab ahaan udhacay.

### Soo gudbi waxa idin dhixmaray

Islamarkaba sheeg in laanta socdaalku gurigaaga  
yimaadeen.

Hadaad dagantahay New York wac Mashruuca Difaaca  
Soogalootiga:  
**212-725-6422**

Hadaad kunooshahay meal kabaxsan New York,  
wac haayada nited We Dream:  
**1-844-363-1423**



# HADII LAANTA WADA DHEXDEEDA...

## Waydii hadaad iskabixi karto

Hadii saraakiisha socdaalku kugu qabtaan wadada ayna bilaabaan inay su'aalo kuwaydiyaan, isla markaba codso inay kufasaxaan.

Haday kudhahaan waad fasaxantahay, usheeg inaadan doonayn kajawaabida su'aalahooda kadibna **kadhaqaaq.**

Haday udhaahaan mafasaxnid, usheeg:

**"WAXAAN  
CODSANAYAA  
QODOBKA SHANAAD  
WAXAANA XAQ  
ULEEYAHAY  
INAANAN WAXBA  
SHEEGIN."**

## ha u ogolaan inay kubaaraan

Ha ufasisixin in saraakiisha socdaalku baaraan alaabtaada ama jeebabkaaga.

Usheeg:

**"MA OGOAANAAYO  
BAARISTAAN."**

## Hakajawaabin su'aalaha

Hakajawaabin su'aalaha kusaabsan soogalootimadaada ama meesha aad katimid. Usheeg inaad haysato xaga ah inaad aamusnaato.

## hatusin wax dukumiinti ah

Hasiinin saraakiisha wax dukumiintiyo aqoonsi oo muujinaaya qofkaad tahay ood wadankaaga kalatimid (sida baasaboorkaaga).

## Soosheeg waxaaad aragtag

Isla markaba sosheeg in laanta socdaalku jidka kugu qabteen.

Hadaad dagantahay New York wac Mashruuca Difaaca Soogalootiga:

**212-725-6422**

Hadaad kunooshahay meel kabaxsan New York, wac haayada nited We Dream:  
**1-844-363-1423**


In laanta socdaalku jidka kugu qabato waxay kugu abuuri kartaa cabsi xoogan, laakiin hacararin ama kaqixin gurigaaga, hasiin saraakiisha dukumiintiyo been ah, marnana nbeen hasheegin!



# HADAAD WAAJAHDO XARIG AY KUGULA KACAAN SARAAKIISHA SOCDAALKU AMA GURIGAAGA SOOWREERARAAN...

## Duub waxa idin dhixmara

Waxaad xaq uleedayah inaad sawiro iyo muuqaalba kaqaado waxa idin dhixmara. Muuqalka duub adoo taagan meel amaan ah si aadan gafin xariga ama weerarka.



## Xasuus qor samee

Qor

- cadadka saraakiisha meesha timid
- nambaradooda aqoonsiga (hadaad arki karto)
- dharkay xirnaayeen iyo waxa kuqornaa yunifoomkooda ama funaanadahooda
- nooca gaariga ay wateen (adoo qoraaya taargada gaariga).

## Soosheeg waxaaad aragtag

Si degdeg ah usoosheeg waxaaad aragtag!

Hadaad dagantahay New York wac Mashruuca Difaaca Soogalootiga:

**212-725-6422**

Hadaad kunooshahay meel kabaxsan New York, wac haayada nited We Dream:  
**1-844-363-1423**

# HadHadaad leedahay qareen

## QRAREENKAAGU WAA INUU....

1. Kuusharxaa sharciga iyo dookhyada kuufuran si adag
2. Markasta kaaga waramaa kiiskaaga iyo dhamaan taariikhaha/balamaha maxkaada lagu aadaayo
3. Saxiixaa dhamaan waraaqaha uu diyaarinaayo una gudbiyaa dawlada asagoo adigga wakiil kaa ah
4. Uuu kusiiyaa dhamaan nuqlada waraaqaha uu dawlada ugudbiyo (xataa haduu lacag kugu leeyahay)
5. Kuusharxaa isi qoraal ah dhamaan qarashaadka uu kaaga qaadaayo adeegyada uu kuuqabanaayo
6. Uu kajawaabaa wicitaanada iyo emailada aad usoo dirto si dhakhso ah
7. Markasta waa inuu XUSHMAD kusiiyaa
8. Macluumaadkaagana kusugaa meel xafidan



## Waxaad xaq uleedahay:

- \* Inaad waydisato cadaynta shahaadooyinkooda
- \* Inaad hesho risiidka flacag kasta ood bixiso  
**(MARKASTA LACAG KUDHIIB JEEG AMA DALABKA LACAGTA)**
- \* Inaad shaqada kacayriso qareenkaaga aad qareen kale cadsato
- \* Wuxaan xaq uleedahay **iaad hesho nuqlada** codsiyo kasta oo dhanka socdaalka an ama waraaqaha shaqada

## YAAN LAGU KHIYAANIN

## Waligaa lacag KAASH hakubixin

- \* MARKASTA LACAGTA KUDHIIB **JEEG AMA DALABKA LACAGTA!!!**

## cAAWIMAAD DALBO!!

bOOQO [www.protectingimmigrants.org](http://www.protectingimmigrants.org)

## Wac laynka Tooska ah ee New American (800-566-7636)

- \* Raadso qareen lacag la'aan ama raqiis ah ama wakiil sharci
- \* Hel adeegyada kuugudbinaaya wakaaladaha khayriga ah

## QAREENKAAGU WAA INUUSAN MARNA:

1. Ugoyn sooxaadirida maalinta maxkamada ama waraysiga asagoon horay kuugusii sheegin
2. Kuwaydiisan inaad BEEN sheegto:
3. Kuwaydiisan inaad saxiixdo foomam banaan ama kuwaydiisan foomam ay kuqoranyihiiin macluumaa been ah
4. Haysan dukumiintiyadaada rasmiga ah
5. Kuwaydiisan inaad dukumiintiyo been ah dirto



YAAN LAGU KHIYAANIN

SITAXADAR LEH U AKHRI dhamaan dukumiintiyada kahor intaadan saxiixin

WALIGAA LACAG HAKUBIXIN AMA HASAXIIXIN foomamka banaan ee socdaalka AMA BEENTA AH MACLUUMAADKA

Marna ha uga tagin dukumiintiyada orijinaanlka ah qofkale

Markasta nuqulo koobi ah kalabax dukumiintigaaga

## CAAWIMAADA DHANKA SOCDAAKA

- \* **Kaliya qareenada iyo wakiilada shahaadada kahysta BIA** ayaa bixin kara talo dhanka sharciga ah
- \* **Marna lacag hasiin “Notario”, laan socdaal, taksi diyaarshe, ama diyaarshaha foomka** si ay kuugu sheegaan midka uu yahay codsiga aad ubaahantahay ama ay kaacaawiyaan diyaarintooda
- \* **Inaad foomka khaldan buuxiso kaliya maaha lacag khasaarin–waxay kuukeeni kartaa in dalka lagaa tarxiilo**

## HADAY RUNTU KULATAHAY MID WANAGSAN, RUNTII WAY TAHAY!!!

- \* **DADKA WAX KHIYANA waxay badanaa kuubalanqaadyaan faaiidooyin dhanka socdaalka ah oodan xaq ulahayn, kaliya si ay lacagtaada uqaataan!**
- \* Qareenada iyo **wakiilada shahaadada kahysta BIA** ayaa **laga doonayaa inay runta sheegaan, xataa hadaysan war fiican ahayn**

Dhamaan dukumiintiyada BIAASHKA ah ee socdaalka:

[www.uscis.gov](http://www.uscis.gov)